

Iska tuur daawooyinkaada aadan rabin

Get rid of your unwanted medicines



Si sax u tuurida waa muhiim

Waa doorashada deegaanka ee saxda ah

Daawooyinka lagu falaashay biya-mareenka ama lagu tuuro qashinka waxay wasakhayn karaan biyaha, waxyeellayn karaan duurjoogta waxayna wasakhayn karaan biyaha la cabbo.

Ka hortag si xun u isticmaalka iyo la qabsiga daawooyinka

Si xun u isticmaalka iyo la qabsiga dawooyinka dhakhtarku kuu qoray waxay heer dhibaato ah ka maraysaa gudaha Maraykanka. Shantiiba afar ka mid ah daawooyinka dhakhtarka soo qoray ee uu farmashiga u cabeeyo bukaanada waa opioids. Si shil ah u sumoobida ayaa sidoo kale kor u sii kacaysa. Waa muhiim inaad qaybtaada ka qaadato sidii looga hortagi lahaa in daawooyinkaaga aanay si khaldan u isticmaalin dadka kale.

Maxaa la aqbalaa?

Daawooyinka la aqbali karo waxay ku kala gadisnaan karaan sanduuqa daawada. Ka hel linkiyada tooska ah oo la xidhiidha ogolaanshaha farmashiyaha madaxa banaan, iyo liiska waxa laga aqbaloo sanduuqyada daawada lagu maareeyo shuraakada Hennepin County barta hennepin.us/medicine.

Aan la aqbalin

- ✗ Lama oggola qashin, baytariyo, qalabyada caafimaadka, heerkulbeegyada meerkuriga ah ama walxaha kale ee halista ah.
- ✗ Lama oggola daawooyinka sharci darrada ah (Schedule 1)
- ✗ Lama oggola irbado, wax caarad leh ama silingo. Ka hel qaababka loo tuuro cirbadaha, walxaha caarad leh iyo silingaha barta: hennepin.us/green-disposal-guide/items/needles-sharps
- ✗ Lama oggola daawooyin laga soo gatay meheradaha
- ✗ Lama oggola waxyaalaha la isku qurxiyo iyo alaabta daryeelka shakhsi ahaaneed

Haddii aad booqanayso sanduuq ku yaal farmashi madax-bannaan, hubi inaad booqato websaydkooda si aad u hesho liis dhamaystiran oo ah waxa laga oggolyahay iyo waxa aan laga oggolayn sababtoo ah waxaa jiri kara waxyaabo dheeraad ah oo aan ahayn kuwa kor ku qoran.



Ugu kaydi daawooyinka si badbaado leh guriga iyo markaad ka baxayso

Dhalinyaradu ayaa khatar ugu jira

Dadka da'doodu u dhaxayso 18 ilaa 25 sano jir, 14.4% waxay sheegeen in aan xanuun daaweyn loo isticmaalin dawooyinkuu dhakhtarka soo qoray sannadkii la soo dhaafay. Dhallinyarada da'doodu u dhaxayso 12 ilaa 17 jir, 4.9% waxay sheegeen in aan xanuun daaweyn loo isticmaalin dawooyinkuu dhakhtarka soo qoray. Dhallinyarada si xun u isticmaala dawooyinka dhakhtarku qoray, 62% waxay sheegeen inay doorteen inay si khalidan u isticmaalaan sababtoo ah way fududahay in laga helo armaajooyinka daawada ee waalidka.

Meel amaan ah ka dhig

Si ammaan ah u kaydi daawooyinka aad sida joogtada ah ugu baahan tahay. Dhig meelayna arkaynin ayna gaadhi karin dadka kale, oo ay ku jiraan carruurta, qoyska, asxaabta iyo dadka ku soo booqda. Inta u dhaxaysa farmasiga iyo gurigaaga, ku kaydi boorsooyinka iyo dhalooyinka ay ku jiraan daawooyinka lagu soo qoray jirkaaga ama meel aan la arkaynin.

Isku day inaad geliso sanduuqa quful leh, ama ku rakib quful armaajada lagu kaydiyo daawada. Haku jiraan daawooyinka weelkoodii ay ku imaadeen.

- Ha kaydinin ama qofna hala wadaagin daawooyinka aan la isticmaalin.
- Ku tuur daawooyinka aan la isticmaalin sanduuqa lagu rido daawada

Waxbadan oo ku saabsan kaydinta nabdoon ka ogoow barta hennepin.us/safestorage

Goobaha sanduuqa lagu rido daawada

Waxa jira in ka badan 65 sanduuq oo dawooyinga lagu rido ku yaal Hennepin County barnaamijkuna wuu sii fidayaa.



Booqo hennepin.us/medicine si aad u aragtid liiska goobaha oo dhamaystiran



Sanduuqa lagu rido daawada ee iigu dhow waa:

Hennepin County
Environment and Energy
environment@hennepin.us
612-348-3777

34-504-0250-23 Somali

